

4 LAGU BIXINAYO KULLIYADA: DHAMMAAN

KU SAABSAN WASFA

MAXAY TAHAY WASFA?

Codsiga Washington ee Kaalmada Federaalka (WASFA) waa tallaabada koowaad ee lagu codsado **kaalmada dhaqaale** ee qayb ardayda aan sharciga lahayn ah kuwaas oo ku nool gobolka Washington. Buuxinta WASFA waa bilaash oo waxay ku siisaa ardayda u qalanta helida **kaalmo dhaqaale ah** si ay u bixiyaan tababarka shaqada, farsamada, 2-sano iyo 4-sano oo kulliyadaha ku yaala Washington. Aan sharci laheyn ardayda leh ama aan laheyn **(DACA)** w/waxay dhameystiri karaan WASFA.

Haddii aad tahay Muwaadin Maraykan ah ama qof sifo sharci ah ku degen, ka eeg qormada "Ku saabsan dhammaan FAFSA" oo ha buuxin WASFA.

KUMAA U QALMA INUU CODSADO?

U qalmida waxay ku salaysantahay **sharciga**

socdaalka la haysto. Ardaydu waa inay buuxiyaan shuruudaha barnaamijka degnaanshaha. Waxyaabaha gaarka ah, isticmaal su'aalaha xog qaadista u qalmida ee readysetgrad.org/wasfaelig

SIDEEN U BUUXIYAA IYADDA?

1. Booqo readysetgrad.org/wasfa oo riix "Bilaw WASFA Cusub."
2. Dhammaystir su'aalaha xog qaadista xaq u lahaanshaha.
3. Samayso kooto oo kaydii erayga soo gelida iyo kelmadda sirta ah.
4. Buuxi oo soo gudbi codsigaaga.

Maxay tahay saxeexa waalidka ee WASFA? Waxaad u baahan doontaa inaad iimayl marti qaada ah u dirto mid ka mid waalidka (dhalay ama korsaday) si koronto ahaan loogu saxeexo WASFA. Hubso adiga iyo waalidkaaga inaad isticmaashaan iimaylo kala duwan.

✳ **Ha ilaabin:** Saxeexa waalidkaaga waxaa looga baahan yahay in la dhammaystiro codsigaaga.

✳ **Waalidka waa inay koronto ahaan saxeexaan gudaha 72 saacadood marka la marti qaado.**

GOORMA AYAAN SAMAYNAYAA?

Soo gudbi goor hore oo ah **Oktoobar 1 sanadkaaga sare.**

Iska hubso **inaad taqaano kaalmada dhaqaalaha** **Ahmiyada muddooyinka liio qabtay** xaga

kulliyada aad xiisaynayso. (Inta badan muddada ay dhacayso WASFA ma qorna, laakiin waxay la mdi tahay muddada ay dhacayso FAFSA.)

Waxaad uga baahantahay **inaad gudbiso WASFA** sanad kasta markaad kulliyada ku jirto.

MAXAY TAHAY MACLUUMAADKA AAN U BAAHANAHAY?

Macluumaadka bilowga ah, sida magaca sharciga, taariikhda dhalashada, iwm.

Waalidka iyo ardayga **cashuurta/macluumaadka dakhliga**

Liiskaaga **kulliyadaha** (kulliyadaha gobolka Washington oo keliya)

Lambarkaaga **DACA haddii aad mid leedahay**

Miyuu macluumaadkaygu ilaashanyahay?

Gollaha Guul gaadhida Ardayga Washington (WSAC) iyo kulliyadaha hela codsigaaga keliya waxay u isticmaalaan macluumaadka inay go'aansadaan u qalmida kaalmada dhaqaale ee gobolka. Goobaga waxbarasho looma oggola inay isticmaalaan macluumaadka wixii ah ujeedooyinka ama la wadaagaan xogta kooxaha kale.

Haddii aad hayso su'aalo ku sabasan WASFA, kala xidhiidh Washington Student Achievement Council (WSAC) lambarka 1-888-535-0747, doorashada 2 ama iimaylka wasfa@wsac.wa.gov.

MAAYO: FASALKA 11

SEBTAMBAR: FASALKA 12

